



qiyaamaha calaamadihiisa waxaa ka mid ah: in cilmiga la waayo, jahliguna bato, sinaduna badato, khamriga cabidiisuna badato, oo ragu yaraado, dumarkuna bataan, ilaa kontonkii dumar ahba hal nin ku soo tooso

Anas Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan idiin sheegin xadiis aan ka maqlay Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate xadiis kaas qof aan aniga ahayn idiin sheegi maayo: waxaan ka maqlay Rasuulka isagoo leh: qiyaamaha calaamadihiisa waxaa ka mid ah: in cilmiga la waayo, jahliguna bato, sinaduna badato, khamriga cabidiisuna badato, oo ragu yaraado, dumarkuna bataan, ilaa kontonkii dumar ahba hal nin ku soo tooso.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuxuu cadeeyey in calaamadaha qiyaamaha dhawaadkeeda ay ka mida tahay in la qaado cilmiga shareecada, waayo culumadaa dhamaanaysa. Taas waxaa ka imaanaaya in jahligu faafo siina bato, na sinada iyo faaxishadu faafto, khamri cabiduna badato, tirada raguna yaraato, tirada dumarkuna badato, ilaa kontonkii dumar ahba uu ku soo aado hal nin, kaasoo danahooda iyo maslaxadooda ka shaqaynaya.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65021>

